



DISCOVER

— ITS BEAUTY —

Ogoow Quruxdiisa



Runta Biyo-kama Dhibcaanka ah ee Islaamka

Dhammaan Nebiyada iyo Rasuullada Eebbe — oo ay ku jiraan Aadam, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, iyo Muxammad — waxaa diray Ilaah keliya: Allaah, Abuuraha. Dhammaantood waxay gudbiyeen fariin isku mid ah oo abadi ah:

“Waxa jira Ilaah keliya oo run ah (Allaah), Abuuraha. Caabuda isaga oo keliya.”

Wixii macluumaad dheeraada ah iyo wada sheekaysi:



www.discoveritsbeauty.com

Magacyada iyo Caqiidada Muhiimka ah ee Islaamka

Allaah waa magaca Ilaaha keliya ee runta ah, Abuuraha. Allaah waa Ilaaha dhabta ah ee bani'aadamka oo dhan.

Muxammad ﷺ (Nabadgelyo iyo barakada Allaah ha ahaato korkiisa) waa Rasuulkii ugu dambeeyey ee Allaah. Eebbe wuxuu u diray dhammaan dadka.

Quraanka Kariimka (Qur'an) waa Hadalkii ugu dambeeyey ee Allaah (Ilaah), waxaana la soo dhiibay Nebi Muxammad ﷺ.

Islaam micnihiisu waa isu dhiibid Allaah, Ilaaha keliya ee runta ah.

Muslim waa qofka isu dhiiba Allaah oo caabuda isaga oo keliya.

Albaabka Farxadda iyo Badbaadada ee Islaamka (Shahaadada iyo Qiritaanka Iimaanka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay.”

(Dhagayso dhawaaqa shahaadada oo Af-Carabi ah)

Tani waa qirista iimaanka ama shahaadada ee qofku u baahan yahay inuu ku dhawaaqo si uu u galo Islaamka; waxay koobsanaysaa runta, quruxda, iyo fudaydka Islaamka.



Somali